



## Department for Levelling Up, Housing & Communities

**Rt Hon Michael Gove MP**  
*Secretary of State for Levelling Up, Housing and  
Communities*  
*Minister for Intergovernmental Relations*

**Department for Levelling Up, Housing and  
Communities**

4th Floor, Fry Building  
2 Marsham Street  
London SW1P 4DF

**Email:** GrenfellTowerSite@communities.gov.uk  
**Phone:** 0303 444 0011

17-kii Diseembar 2021

Waxaan rajeynayaa in ay warqadan idin soo gaarto idinka oo nabadqaban oo wanaagsan.

Biliihii la soo dhaafay waxaan kulamo la qaatay qoysaska laga dhintay, kuwa badbaaday, iyo kooxaha wakiillada ah, waxaanan dhammaantiin idinla wadaagay fikradayda warqaddaydii ku taariikhaysnayd 4-tii Nofeembar. Waxaan rabay inaan mar kale idiin soo qoro tallaabooyinka xiga.

Waxaan si cad uga maqlay kuwa ay arintu aadka u saameysay **in hadda aysan ahayn waqtigii saxda ahaa ee go'aan laga gaari lahaa mustaqbalka Grenfell Tower**. Jawaabcelinta waxay ahayd in la-tashiyada ilaa maanta la dareemay degdeg iyo waqti aan ku filnayn in la siiyay qof walba si uu u dhiibto ra'yigiisa. Iyada oo la ixtiraamayo kuwa aan weli dareemin inay awoodaan inay ra'yigooda dhiibtaan, waa sax inaan waqti badan siino arrintan. Dadkii horeba ra'yigooda, su'aalhooda iyo dareenkooda iila wadaagay, waan u mahadcelinayaa. Waxaan idiin xaqiijinayaa in aragtiyahaas weli lagu xisaabtami doono, oo aan loo baahnayn inaad dib u soo gudbiso, inkasta oo ay idiin furan tahay inaad sidaa sameyso.

**Waxaan go'aansadey in aan la wado hawlaha nabadgelyada ee tower-ka iyada oo waafaqsan talada engineernimada (ee la daabacay bishii Maajo) si loo hubiyo xasiloonideeda ilaa go'aan laga gaarayo. Arintani waxay na siin doontaa waqti dheeraad ah si aanu idiinkala hadalo oo idiinkana dhegeysano, arimaha ku saabsan mustaqbalka Tower-ka.** Waxaan rabaa in la maqlo ra'yiyo badan oo kala duwan, wada-hadalladanina waxay gacan ka geysan doonaan go'aaminta goorta iyo sida go'aanka loo wajahayo. Isla markaana, waxaan ka hadli doonaa arrimaha kale ee muhiimka ah iyo welwelada aad soo bandhigteen. Gaar ahaan:

- dib u eegis madax bannaan oo dheeraad ah oo ku saabsan talada engineernimada si loo hubiyo furfurnaanta iyo hufnaanta xaaladda taagan ee tower-ka
- sida ay caddaaladu u tahay qayb muhiim u ah geedi-socodka iyo in wixii dhismayaal oo suurtagal ah oo laga dumiyo tower-ka ka hor inta aan la dhamaystirin baaritaanka ama baaritaanada booliisku aanay saamayn ku yeelanayn dembi-baarista ama baaritaanka. Iyada oo qayb ka ah tallaabooyinkayga xiga, waxaan la shaqayn doonaa booliiska, baaritaanka iyo hay'adaha kale ee caddaalada si aan dammaanad dheeraad ah idiin siiyo.

Waxaan ka codsaday mas'uuliyiintayda **inay idinla shaqeeyaan oo ay isticmaalaan dhammaan wadiiqooyinka la heli karo si ay gacan uga geystaan horumarinta habka ka-qaybgalka kaas oo si wanaagsan ugu suurtagelin doona qof walba inuu dhiibo aragtidiisa.**

Mar kale ayaan warqad idiin soo qori doonaa bilowga sanadka soo socda taas oo ay ku qoran yihiin faahfaahin ku saabsan waxa aad ka filan kartaan ka qaybgalkan, iyo siyaabaha kala duwan ee aanu idiinla hadli doono, iyo sidoo kale faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida aragtidiina loo tixgelin doono.

Waxaan fahamsanahay in dadka dhintay, kuwa badbaaday iyo dadka deegaanka ay qabaan aragtiyo kala duwan oo ku saabsan tower-ka iyo in qaarkiin, laga yaabo in aanay soo dhawaynayn warka sheegaya in uu sii jiri doono muddo dheer. Waxaad ahaanaysaan codad muhim u ah wada hadalka waxa mustaqbalka ku dhici doonatower-ka. Waxaan rabaa inaan kuu xaqiijiyo in kuwa ku nool, ka shaqeeya ama wax ku barta meel u dhow ay sii wadi karaan inay sidaas sameeyaan cabsi la'aan. In kasta oo tower-ka uu yahay qaab-dhismeed burburay, xaaladdiisuna ay sii xumaanayso muddo ka dib, tallaabooyinka aan qaadnay ilaa maanta, sida duubista tower-ka iyo rakibidda qalabyo dheeraad ah, waxay ahaayeen in la ilaaliyo tower-ka oo xasiloon oo ammaan ah. Korjoogteynta joogtada ah ee meesha waxay ka dhigan tahay, haddii arintani isbedesho, waxaan awood u yeelan doonnaa inaan isgaarsiino isbeddel kasta oo loo baahan yahay isla markiiba.

Waxaan jeclahay in aan mar kale xaqiijiyo mabaadii'da la saxiixay sanadkii 2018, kuwaas oo soo bandhigey ballanqaadyada dawladda ee ah in bulshada laga dhigo xudunta go'aaminta xus ku habboon goobta, oo ay weheliso sida go'aamada mustaqbalka ee Grenfell Tower loo wajaho loona qaadanayo. Kuwan waxaa lagu daray in go'aamada maareynta goobta iyo go'aan kasta oo keenaya in tower-ka la dumiyo uu mudnaanta siin doono nabadgelyada iyo amniga goobta iyo baaritaanka booliska ee socda iyo Xog-baritaanka. Waxaa arintan loo yeelayaa si loo hubiyo in go'aanadu aysan khatar gelin caddaaladda dembiyada ama hababka xog-baaritaanka midkoodna. Ka-qaybgalka arrintan muhiimka ahi waa inay noqotaa mid xasaasi ah oo si buuxda loo ixtiraamo muhiimadda Grenfell Tower u leedahay qoysaska laga dhintay, kuwa badbaaday iyo bulshada deegaanka. Ka labalabayn maayo in aan dib u xaqiijiyo go'aankan oo ah hage sax ah oo ku wajahan waxqabadka dawladda hadda, sidii ay u ahaayeen 2018.

Waxaan fahamsanahay in wadahadal kasta oo ku saabsan mustaqbalka Grenfell Tower uu noqon karo mid adag. Haddii aad jeceshahay in aad qof kala hadasho , Adeegga Caafimaadka iyo Xaalad-wanaaga ee Grenfell waa adeeg NHS-ta ah oo lacag la'aan ah, qarsoodina ah loogua talagaley caruurta iyo qaangaarka. Waad soo wici kartaa adiga oo adeegsanaya **020 8637 6279**, email **grenfell.wellbeing@nhs.net** ama booqo **grenfellwellbeing.com**.

Mar labaad, waxaan jeclahay inaan u mahadceliyo kuwiina waqti geliyay inaad ila kulantaan labadii bilood ee lasoo dhaafay. Waxa aad ii qiiro galiyay sheekooyinka shaqsiga ah, daacadnimada iyo heelanaanta adkaysiga leh ee caddaalada ee ay bulshadani si hagar

la'aan ah u muujisay. Fikradayda iyo rajadayda ugu wanagsan ayaa idinla jirta idinka adiga iyo qoysaskiina inta lagu jiro wakhtiga afar sano iyo bar guuradii ka soo wareegtay masiibadii iyo xilliga ciidaha soo socda. Waxaan rajeynayaa inaan mar kale idinla kulmo sanadka cusub.

**Aniga oo wax walba oo wanaagsan idiin rajeynaya,**

A handwritten signature in black ink that reads "Michael Gove". The signature is written in a cursive style with a large initial 'M' and a long, sweeping tail on the 'G'.

**Rt Hon Michael Gove MP  
Secretary of State for Levelling Up, Housing and Communities  
and Minister for Intergovernmental Relations**